**Xeerka L. 258 rep.**

**Aqoonsiga shaqsiyadda qaanuuneed Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya iyo ansixinta Xeerka dhismaha.**

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

**MAAMULAHA MARKA UU ARKAY**

Marka uu arkay Dekereetada madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga 9 Disember 1952, lamba. 2357;

Marka uu arkay arjiga ku taariikhasan 9 Juun 1954 ee uu keenay Mudane dott. Francesco Monti kaaso isago haya Xilka Rugta Ganacsiga la weydiistay in la aqoonsado shaqsiyadda qaanuunee si waafaqsan sababaha qod.12 X.M ee Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha Soomaaliya;

Marka uu arkay xeerka lagu dhisay Rugta Ganacsiga la soo sheegay, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya ee taariikhda 7 Julaay 1944 ee lagaa sameeyay Notaayada Minniti cav. Demetrio;

Marka uu garowsaday in ay habboontahay in la aqoonsado shaqsiyadda qaanuuneed Rugta Ganacsoga, Warshadah iyo Beeraha ee Soomaaliya;

**WUXUU DEKEREETO KU SOO SARAYAA:**

**Qod. 1**

Waxaa la aqoonaday shaqsiyadda aqooneed ee Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya kuna taalla Muqdisho.

**Qod. 2**

Waxaa la meelmariyay lifaaqa xeerka dhismaha Rugta Ganacsiga,Warshadaha iyo Beeraha Soomaliya oo ka kooban 42 qodob.

**Qod. 3**

Dekeretadan waxay dhaqangalaysaa taariikhda lagu baahiyo Baafinta Rasmiga ee A.F.I.S

Muqdisho, 23 Disember 1955.

Maamulaha

**Anzilotti**

La hubiyay lana diiwaangeliay – Diw. lamba.12. bogga lamba. 232

Mogadisho, 31 Disember 1955.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**

## RUGTA GANACSIGA, WARSHADAHA IYO BEERAHA SOOMAALIYA

## XEERKA LAGU DHISAY

### Qod. 1

Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya Xarunteedu waa Muqdisho, awoodeeduna waa gaarsiisantahay dalka oo idil.

### Qod. 2

Rugta Ganacsiga, Warhadaha iyo Beeraha Soomaaliya waxay ka wakiiltahay si midaysan oo dhammaystiran qaybha dhaqaalaha, waxayna horumarisaa oo isku duwdaa hawlgalladooda.

Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha Soomaaliya waa Wakaalad leh shaqsiyad qanuuneed. Iyadu waxaa xakamayn (kontrol) ku leh Maamulaha. Ulajeeddadaasna waxaa loo wareejiyay Maamulaha dhamman go'aanada ay gaaraan xubnaha rugta oo ay ku jirto miisaaniyadda la saadaaliyay. Qaabka lagu meelmarinayo xeerakaan waxay ku qoranyihiin Nidaamkan qod. 40.

### Qod. 3
### Hadafka iyo Xilalka

Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha Soomaaliya ka sokow awoodaha uu xeerku siiyay waxay u xilsaaranyahiin:

a) faafinta isbadallada, liistooyinka qiimaha, ogaysiisyada, **sanadlaha**, waegaysyada xilliyeedka, macluumaadka dhaqaalaha ee ku saabsan ganacsiga, warshadaha iyo beeraha;

b) keydinta diiwaanada lagu qoro shirkadaha ku hawllan ganacsiga, warshadaha iyo beeraha;

c) uruurinta ama uruurinta caadooyinka ganacsiga iyo dhaqamada Soomaaliya;

d) uruurinta iyo sare u qaadista xogaha tirakoobyada ganacsiga ku lugle, warshadaha iyo beeraha;

e) uruurinta iyo keydinta samballada wax soo saarka dhoofinta iyo soo dejinta;

f) daraasaadka dhibaatooyinka idil ee ku lugle dhaqaalaha Soomaliya, xitaa haddii wada shaqayn lala yeelanayo guddiyo gaara oo ka kooban khuburo arrimaha gooniya u qaabilsan;

g) In ay dhexdhexaadiyaan muranada shaqo ee la horkeeno iyago u qabana guddi heshiiya iyo dhexdhexaadin;

h) in horumariyaan fikrad kasta oo wax ku oola u ah horumarka dhaqaalaha Dalka;

i) abaabulaan in Soomaaliya ay ka qaybgasho Bandhigyada Caalamiga iyo kuwa maxalliga iyo in ay sameeyaan abaabulka Bandhigga Soomaaliya;

l) hindisaan iyadoo lagu saleynayo xeerka nidaamka loo dejin doono xubnaha uu ka koobanyahay kaalinta mamulka garsoorka, iskuduwidda kaalimaha khuburada ganacsiga, warshadaha iyo beeraha, qiimeyeyaasha iyo lacag qaadayaal guud iyo dhex-dhexaadiyalka guud; ay hayaan buugga dadka wax dhoofiya iyo kuwa wax kala saara, kuwa ka **shaqeeya** suufka;

m) in ay diyaariyaan marka uu aqbalo Maamuluhu Soomaaliya, dirista ergooyin ka qaybgala Shirweynaha, Golaha iyo hay'adaha leh dabeecadaha dhaqaale;

n) diyaarinta dhisidda saylad ganacsi iyo suuqyo;

o) qaabaynta tala soo jeedin, Maamulaha Soomaaliya iyo in ay ka tala bixiyaan fikradahooda arrin kasta oo la horkeena.

**Qod. 4**

Waxaa shuraako joogto ah ka noqon kara Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha dadka iyo hay'adha leh shaqsiyadda qaanuuneed oo ku yeelan kara kaalin ay uga qaybgalaan raasamaalka oo haysta ruqsad uu ku samaysto hawlgallo warshadeed, ganacsi iyo beero. Kuwa doonaya in ay ka mid noqdaan shuraakada waa in ay codsi qoraale u soo gudbiyaaan si ay helaan is-qoritaanka isaga.

**Qod. 5**

Oggolaashaha xubinimada waxaa awood u leh Golaha Agaasinka.

**Qod. 6**
**Xubnaha Rugta**

Xubnaha Rugta Ganacsiga waa:

1) Guddookiyaha;
2) Guddoomiye Ku-xigeenka;
3) Golaha Guddoonka;
4) Golaha Agaasinka;
5) Qaybaha;
6) Guddiga **Saxitanka;**
7) Golaha Guud ee shuraakada;
8) Agaasimaha Xoghaynta.

Xilka xoghaynta waxaa qabanaya Agaasimaha Xoghaynta halka qaybahana uu qabanyo sarkaal ka tirsan xoghaynta iyada oo si cad loogu xilsaarayo.

**Qod. 7**

Golaha Agaasinka Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliy wuxuu ka koobanyahay 21 xubnood oo toddobo laga soo doorto ganacsatada, toddobo laga soo doorto warshadaha- farshaxanka iyo toddoba laga soo doorto beeraleyda.

Tirada Goluhu ka koobanyahay waxbaa laga baddali karaa marka ay habboonaato in la kordhiyo. Kordhinta waxaa soo jeedi kara Golaha Guddoonka waxaana oggolaanaya Golaha Agaasinka.

**Qod. 8**

La-taliyeyaasha waxay xilka haynayaan sanad hasayeeshe dib ayaa loo dooran karaa.

**Qod. 9**

La-taliyeyaasha waxaa dooranaya aqlabiyadda sanadlaha Golaha Guud ee shuraakada. Mid kasta oo ka mida saddex qaybood ee ganacsiga, warshadaha-farshaxanka iyo beeraha waxay dooranaysaa la-talyeyaashooda.

**Qod. 10**

Golaha agaasinka wuxuu iska dhex dooranayaa Guddoomiyaha iyo saddex Guddoomiye Ku-xigeenka. Guddoomiyaha wuxuu leeyahay wakiilnimada sharciga ee Wakaaladda. Haddii ay jirto xaalad maqnasho ama xil-gudsho la'aan xilkaas isaga ah waxaa qabanaya Gudoomiye Kuu-xigeenga ugu da'a wayn.

**Qod. 11**

Guddoomiyaha, saddexda Guddoomiye Ku-xigeen iyo Guddoomiyeyaasha qaybaha waxay noqonayaan Guddoonka.

**Qod. 12**

Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaliya waxaay u habaysantahay qaybo kala ah:

1. — Qaybta Beeraha;
2. — Qaybta Warshadaha iyo farshaxanka;
3. — Qaybta Ganacsiga iyo adeegyada;
4. — Qaybta Bandhigga, Carwada iyo Dalxiiska.

**Qod. 13**

Qay kasta waxay ka koobantahay sida soo socota:

1. — Guddoomiyaha Qaybta;
2. — 4 La-taliyeyaasha Qaybaha;
3. — Xoghaye.

Qaybta kasta ee xubnaha uu a koobanyahay Golaha Agaasinka ayaa sanad kasta iska dhex magacaabaya Golaha Agaasinka sidoo kale xitaa waxaa la magacaabi kara dad aan ku jirin Golaha oo leh xirfad gaara.

**Qod. 14**

Guddiga Baarista waxay ka koobanyihiin shan xubnood, sddex joogto aha iyo laba keyd ah, kuwaso affar ka mida cod aqlabiyad ee Gilaha ah lagu doorto, xitaa waxay noqn karaa qaaar aan ka mid ahayn shuraakada iyo kan shanaad oo qabanaya xilka Guddoomiyaha oo uu magacaabo Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya.

**Qod. 15**

Guddiga Baarista xisaabadka waxay baaraan maamulka waxayna wargaliyaan Golaha Agaasinka iyo Goaha shurakada natijada indhoindhaynta. Guddiga baarista waxay leeyihin awood kasta ee uu sharcigu siinayo baarayasha Shirkadaha saamilayda.

**Qod. 16**

Golaha Agaasinka waa hay'dda fulinta ee Golaha oo xilsaarn gaarista ujeeddooyinka Wakaaladda. Golaha agaasinka waxay meelmariyaan miisaniyadda kutalagalka**,** waxay ogagalaaddaan nidaamayada gudaha. Waxaa kaloo xilkooda ka mida in ay talooyin iyo codbixinta arrimaha ay u soo bandhigaan Maaamulka, Dawladda, Guddomiyaha Rugta Ganacsiga iyo La-taliyeyahiisa.

**Qod. 17**

Go'aamada Golaha Agaasinka waxaa lagu meelmrinaya cod aqlabiyad ah, haddii codadku ay isla ekaadan halka uu maro codka Guddoomiyaha ama Ku-xigeenkiisa ayaa meelmaraya.

Codbixinta qarsoodig, haddii codadku ay isla ekaadaan waxaa loo qaadanayaa tala soojeedinta in ay jabtay.

**Qod. 18**

Sabab kastaba haddii Golaha Agaasinka qaar ka mida ay fasax ku jiraan, kan dambe wuxuu magacaabaya La-taliyaal cusub oo baddala kuwooda maqan, laakin markastaba waa in aanay maqnan isla markaas tira ka badan 1/3 La-liyeyaasha xilka haya. Xaaladdaan dambe waa in la isgu yeero 30 cisho gudahood Golaha Guud ee Shuraakada si loo cusboonaysiiyo xilalka bulshada.

**Qod. 19**

Golaha Guddoonka waxay qaabeeyaan miisaaniyadda kutalagalka iyo xisaab xirka, waxay habeeyaan nidaamyada gudaha, waxay go’aan ka gaaraaan dhammaan arrimaha, marka laga reebo waxyaabaha u gaarka ah Golaha Agaasinka iyo Qaybaha. Waxay magacaabaan shaqaalaha iyo dhaqaalaha iyaga ku baxaya.

Xaaladaha Deg-degga Golaha Guddoonla waxay xitaa go’aan ka gaaraan arrimaha u gaarka Golaha Agaasinka iyo qaybaha, hasayeeshe xaaladahaaso kale waa in ay horgeeyaan go’aamada ay gaareen qolada shaqada ku leh si loo ansixo.

**Qod. 20**

Guddoomiyaha ayaa leh wakiilnimada sharciga ee Rugta; isaga isugu yeeraya oo shir guddoominaya Golaha Agaasinka iyo Golaha Guddoonka, waxayna gooyaan hawlmaalmeedka Golaha Agaasinka iyo Golaha Guddoonka, waxay guddoomiyaan habsami u socodka hawlaha xafiisyada, waxay kalo saameeyaan waxyaabaha ku saabsan maamulka caadiga; waxay ku dhaqaaqaan tallaabooyinka idil ee looga baahanyahay habsami u socodka xubnaha ka tirsan Rugta Ganacsiga, warshadaha iyo Beeraha.

**Qod. 21**

Guddoomoyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Rugta Ganacsiga, iyo sodoo kale Guddoomiyeyaasha Qaybaha waxay xilka haynayaan sanad.

**Qod. 22**

Qaybaha ayaa leh in ay diyaariyaan mashaariicda, qaabeeyaan tala soo jeedimada, dhiibtaan fikradaha iyo codaynta arrimaha ay u xilsaranyihiin iyo daraasadda mowduucyada uu u soo gudbiyo Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga.

**Qod. 23**

Jagooyinka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka lacag laguma qaadanayo. Waxa loo oggolyahay keliya in loo celiyo kharashka ay ku galeen hawlgudashada xilkooda la xariira.

**Qod. 24**

Xaafiisyada Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya waxaa hoggaaminaya Agaasimaha Xoghaynta. Agaasimaha Xoghaynta, amase cidda xilalkaas ka baddasha, waxay ka masuul tahay waxqabadka hawlaha Rugta.

**Qod. 25**

Golaha Agaasinka waxay iqtiyaar u leeyihiin in ay magacaabaan xubin sharafed ka mida shuraakada Rugta ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya shaqsiyaad wakaaladd ku dhex leh sharaf gaara.

**Qod. 26**
**Doorashooyinka**

Golaha Guud ee Shuraakada waxaa la isugu yeerayaa kulan caadi ah sanadkiiba hal mar si ay u oggolaadaan Miisaaniyadd, warbixinnada Golaha Agaasinka iyo doorasooyinka jagooyinka bulshada.

Golaha Guud ee shuraakada waxaa kaloo kulan aan caadi ahayn isugu yeeri kara Golaha Agaasinka si ay u falanqeeyaan una meelmariyaan tallaabooyin arrimo ahamiyad gaara leh. Golaha waxaa kaloo kulan aan caadi ahayn loogu yeeri karaa marka shan meelood meel shuraakada ay weydiistan Guddoomiyaha.

Golaha Guud ee shuraakada ayaa u xilsaaran in Maamulku meelmariyo waxi isbaddal lagu sameeynayo xeerkaan.

**Qod. 27**

Waxaa u qalma in la doorto shuraakada Rugta Ganacsiga ee bixiyay wixii kiro oyo nidaam bulsho ee la doonaya. Ganacsatada leh dabecadaha shaqsiga, Shirkadaha aan sharciga ku dhisnayn, Shirkadaha wadaagga, Shirkadaha xoola-wadgga xaddidan (accomandita, Shirkadaha saamileyda, waxaa u qalman in la doorto ganacsadaha ku magacaabaan, xubinta shuraakada ku habboon in uu ka hawlgalo shirkadda, mid ka mida shuraako wadaagga, Guddoomiyaha ama Wakiilka Mamulaha, Wakiilka iyo macalinka ee sikastaba haya xilka wakilnimada sharci ee ganacsadaha ama shirkadda.

Shuraakadu waxay ka qaybgali karaan Golaha xitaa iyo iyagoo haysta wakaalad xubin shuraako kale ama isaga u soo wakiilkiisa. Shuraako kasta kama wakiil noqon kara wax ka badan shan shuraako kale.

**Qod. 28**

Lama dooran karo mana u qalmaan:

a) karaaniyaasha Rugta;
b) dadka murannadu kala dhexeeyaan iyaga;
c) Kuwa qayb toosa ka ah shaqooyinka mushaarka lagu qaato, qaadayaasha lacagaha iyo xuquuqda. Go'aanka Golaha Agaasinka waxaa lagu caddayn karaa shuraakada aan u qalmin oo ah qayb toosa oo ka mida maamulka iyo qandaraasyo ay dani ugu jirto Rugta ama urur-hantiyeedka leh ujeeddo faaiido oo siyaaba kala duwan ku soo galay Rugta iyada ah;
d) Kuwa k qaata mushaarka hay'ado ay Rugto maamusho;
e) kuwa maamula lacag ay leedahay Rugtu oo aan xisaab celin keenin;
f) kuwa ku leh lacag dayn ah Rugta, oo la galiyay daynta mudda dhaafka;
g) Maamulayasha Rugta ama aasasayaasha korjoogtaha ku leh; kuwa la caddeeyay in ay masuul ka yihiin dhanka ha ahaati xagga maamulka iyo xagga madaniga arrimaha ay mamulka ku sameeyaan;
h) kuwa ku hoos jira xaaladaha Ilaakinta ama karti laawayaasha;
i) kuwa la siiyay digiin sharci ah iyo ku jira ilaalin gaara;
l) Ganacsatada musalifay inta ay socoto xaaladda musalifnimada, ama laga soo bilaabo taariikhda la aqoonsanyahay in musalifnimadu bilaabatay;
m) Kuwa ku dhacay xukuan laga mamnuucayo xaafiisyada dawladda inta ay noolyihiin;
n) Kuwa uu ku dhacay xukun ciqaaba wax kasta ha ahaato oo la xariira: booli qaan,

baadda, musuq-maasuq mamulka dawlada, xadgudubka shaabbadaha iyo wax is-dabamareyn keydka dadweynaha, xilgudasho la'aan iyo khiyaamo saadka dadweynaha, qarinta dambiga iyo masabidka, ka been sheegedda talada/fikirka, wax-xun sheegidda, urur dambiyeed, dambiya liddiga ku ah aaminadda guud, dambiya liddiga caafimaadka iyo quudinta guud, dagalka, ruufyaanimo**,** dambiyada liddiga hantida xaafiis ahaan loo loo socodsiin karo, lacagaha been abuurka xitaa ha ahaata soo saaraha iyo wakiilada, iyo maamulayaasha.

**Qod. 29**

Qof kasta oo ka dib marka la doorto lumiya shuruudaha wax lagu doortay iyo u qalmidda, xilka wuu waynayaa.

Sidaaso kale waa waynayaa xilka haddii saddex kulan oo isku xigta isago aan fasax gaara haysan ka maqnaada kulamada Golaha iyo Qaybaha. Marka ay dhacdo xaalad la mida kuwa lagu soo sheegay qodobkaan, Golaha ayaa ku dhaqaaqaya xil waayidda, iyagoo ku dhaqaaqayaan sida loo baddali lahaa.

**Qod. 30**

Si loo sameeyo doorasho wax ku oola iyo naaqusa, Shuraakadu Rugta Ganacsiga waxaa loo qaybinaya saddex Qaybood:

a) ganacsato;
b) warshadley iyo farshaxan;
c) beeraley.

Liistada doorashda waxaa la samaynayaa sanad kasta waxaana lagu dhajinayaa Albaabka Rugta Ganacsiga, ugu yaraan shan iyo toban cisho ka hor doorashada.

**Qod. 31**

Kaararka doorashada waa in ay waafaqaan nooca ay oggolaatay Rugta Ganacsiga. Qaababka la soo sheegey waa in lagu muujiyaa Qaybta iyo tirada La-taliyeyaasha loo qoondeeya Qaybtaas.

**Qod. 32**

Golaha Guud ee caadiga waxay kulmayaan caadiyan 31 cisho gudahood sanad kasta. Ogaysiiska kulmidda waa in lagu baahiyaa Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya waana in la faafiyaa iyado warbaahinta la adegsanyo ugu yaraan shan iyo toban cisho ka hor muddada isla Golaha uu qabtay.

Goluhu wuxuu mid saxa noqonayaa tira kasta ha ku yimadeene. Go'aamada ku saabsan wax ka baddalka Xeerka dhismaha waa lagama maarmaan ah in ay joogaan, shaqsiyan ama mid la soo wakiishay ugu yaraan saddex meel xubnaha Shuraakada.

**Qod. 33**

Golaha ayaa u xilsaaran:

a) oggolaashaha Maxdarka Golahii hore;
b) oggolaashaha Warbixinada sanadedka Golaha Agaasinka iyo Guddiga Baarista Xisaabaadka;
c) doorashada Golaha Agaasinka iyo Guddiga Barasyaasha Xisaabadka;
d) wixii isbaddal lagu sameeyo xeerka dhismaha;
e) go'aamada iyo iyo mowduuc kasta la keeno oo ku saabsan hawl maalmeedka.

**Qod. 34**

Golaha Guud ayaa magacaabaya Guddoomiyahoda. Xilka Xoghaynta Golaha waxaa qabanaya Agaasimaha Xoghaynta Rugta Ganacsiga. Golahu wuxuu kaloo dooranayaa laba ilaaliye ee hawlaha dorashada . Maxdarka Golaha isaga ah waa in ay saxiixaan Guddoomiyaha Golaha isaga. Agaasimaha, Xoghayaha ilalieyaasha.

**Qod. 35**
**Hantida iyo Canshuraha**

Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha Soomaaliya waxay bixinaysaa kharashaka hawl socosiinta, ka sokow dakhliga hantida, oo uu wehliyo wixii dakhli la helay:

a) qaybta/saamiga soo gelitaanka shuraakada;
b) qaybta/saamiga sanadlaha ee xubinimada shuraakada;
c) uruurinta xuquuqda shahaadooyinka iyo waraaqaha lagu soo saaray, oo aanay ku jirin kuwa sharci ahaan ah lacag la'aan;
d) wixii kale oo ah qaaraamada Maamulka ee ku saabsan adegyada leh dabeecadda danaha guud oo ay ku jirto danta dhaqaalaha Dalka oo Wakaaladdu ay caddaysay;
e) qaaraanada iska wax u qabso iyo hibooyinka cid saddexaad;
f) kasabyo kala duwan.

Xuquuqda lagu sheegay xarafka c) sanad kasta waxaa lagu goynayaa dekereeto uu soo saro Maamulaha.

Qaybta/saamiga soo gelitaanka shuraakada buuxda ee Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee dhammaantood waa sh.So 20.

**Qod. 36**

a) Qaybta sanadalaha ee xubinnimada Shuraakada buuxda sidan ayaa loo jideeyay: sh. So 120 – sanadkiiba shuraakda haysata shatiga ku saabsan adeegsiga hawlo ganacsi qaybta I ee shurakda warshadaha;
b) 100 – sanadkiiba shuraakada haysata shatiga adegsiga hawlo ganacsi qaybta II;
c) sh. So. – 75 sanadkiiba shuraakada haysata shatiga ee ku saabsan adeegsiga hawlo ganacsi qaybta III;
d) 50 sh. So. – sanadkiiba shuraakada haysata shatiga adeegsiga ganacsiga qaybta IV iyo kuwa farshaxanka.

**Qod. 37**

Hawgallada maaliyadeed ee Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaliya waxay bilaabanayaan bilowga 1 Jannaayo waxayna dhammaamayaan 31 Disember sanad ksta.

**Qod. 38**

Diiwaanka Ganacsiga waxaa eegi kara qof kasta oo codsi u soo qorta Agaasimaha Xogahaynta ee Rugta. Wixii ku saabsan eegiddaas wax xuquuqa laguma lah Rugta Ganacsiga.

**Qod. 39**

Haddii ay suurtageli wayso shaqada Golaha Agaasinka Rugta Ganacsiga ama uu dhaco khalad halis ah Maamuluhu Soomaaliya wuxuu shaqad u xilsaarii karaa hawlaha Kormeere

Dawladeed iyado ay waajib tahay saddex bilood gudahood oo ka bilaabata magacaabistiisa in Golaha Guud ee Shuraahada in ay qabtaan doorashada Golaha Agaasinka.

**Qod. 40**

Xeer nidaamiyaha fulinta xeerkaan waxaa in lagu soo saarayaa sanad gudahiis, marka uu oggolaado Maamulaha.

**Qod. 41**

Inta ay xilka la wareegayaan Golaha Agaasinka ugu horreeya ee lagu dooratay xeerkaan waxaa xilka sii haynaya Agaasinka Golaha ee xeerka jira lagu doortay ee 5 Disember 1948 oo ay wehliyaan oo uu la socdo isbaddallada lagu sameeyay 20 IKtiibar 1950, iyado Golaha Agaasinka isaga uu qabanayo xilalka idil ee uu siinayo xeerkaan.

**Qod. 42**

Haddii la kala diro Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha ee Soomaaliya, hawlaha Wakaaladda iyo hantideeda waxaa loo jihaynayaa si waafasan qaababka iyo ulajeedooyinka ay jideyeen Golaha Shuraakada, kadib marka uu oggolaado Maamuluhu.